OGEYSIIS KU SOCDA COD-BIXIYEYAASHA DOORASHADA HORE

Sharciga doorashada Minnesota wuxuu kuu saamaxaya in aad u cod-bixisid musharixiinta ka tirsan HAL XISBI OO KELIYA ee doorashada hore ee gobolka HA CALAAMADEEN Cod-bixino ka badan hal xisbi. Haddii sidaas u cod-bixisid, cod-bixntaadu Is tirin maayo.

SIDA LOO COD-BIXIYO

1. Cod-bixiyeyaashu dhamaan waa in ay is diiwaan geliyaan.
   - Haddii aad horey isku diiwaan gelisay si toos ah u aad miiska buugga saxiixu yaalo.
   - Haddii aad dooneysid in aad is-diiwaan gelisid, ama cusboonaysiisid is diiwaangelintaada, waxaad tagtaa miiska is-diiwaangelinta. Halkaasi waxaad ku buuxin doontaa arjiga is-diiwaangelinta oo aad tusi doontaa caddayntaada degganaashaha.
2. Saxiix kadibna qaado Risiidka Cod-Bixinta
3. Waxaad aadaa miiska ay saran yihiin warqadaha doorashada waxaadna u dhiibtaa Risiidka Cod-bixinta kadibna waxaa lagu siinayaa warqadda doorashad iyo habkii aad u calaamadeen lahayd.
4. Waxaad aadaa qolka yar ee loogu tala-galy cod-bixinta sida uu kuu sheegay xaakinka qaabilsan doorashada.
5. Cod-bixinadaada waxaad u calaamadeysaa si la mid ah siyaabaha soo socda:



adiga oo buuxinaya qaansada ku hor qoran musharaxa aad adigu dooraneysid.



adiga oo buuxinaya qaansada ku hor qoran musharaxa aad adigu dooraneysid.



adigoo buuxinaya calaamadda cod bixinta

Doorashadaada waxaad ka dhigtaa mid sir ah. Weydiiso kaalmo haddii aad u batid

6. Haddii aad khalad sameysid, waxaad weydiisaa xaakinka doorashada in uu ku siiyo warqadaha doorashada oo cusub. Ha isku dayin in aad tir-tirto ama aad ku qortid xariijin is-dhaaf ah warqadda cod-bixintaada.
7. Waxaad cod bixintaada ku riddaa sanduuqa cod bixinta ama mashiinka xisaabinta. Kaddibna si dhaqso leh uga dhaqaaq goobta cod-bixinta.

DIIWAAN GELINTA MAALINA DOORASHADA

CADDAYMAHA DEGGANAANSHAHA

Dhokomentiga la oggol yahay ee leh magaca iyo cinwaanka hadda ee xaafada:

- Ruqsada dirawalka MN oo sax ah, ruqsada bartaha, kaaraka aqoonsiga MN, ama rasiidhka mid ka mid kuwaas
- Kaarka aqoonsiga ardayga, sawir leh oo sax ah, haddii ay kuliyadaadu siisay saraakiisha doorashada liistada ardayda guryaha
- Kaarka aqoonsiga qabiilka oo leh sawir iyo saxiix
- Diiwaan-gelin sax ah oo xaafada ah oo ku qoran magic kale ama cinwaan kale
- Ogeysiis diiwaan-gelitaan daahay oo uu kuu soo diray hantidhawraha degmada ama karaaniga magaalada
- Cod-bixiye ka sajilan xaafada ayaa qiri kara cinwaankaaga isaga oo raacinaya dhaar saxiix leh
- Shaqaale meesha aad deggan tahay oo qiri kara cinwaankaaga isaga oo raacinaya dhaar saxiix leh

Ama, aqoonsi sawir leh iyo biil hadda ah oo magacaaga iyo cinwaankaaga hadde ee xaafadda leh:

Aqoonsi sawir (laga yaabo inuu dhacay)

- Ruqsada dirawalka MN
- Kaarka aqoonsiga MN
- Baasaboorka maraykanka
- Aqoonsiga milatariga maraykanka
- Aqoonsiga jaamicad, kuliyad, ama kuliyad farsamo ee MN
- Aqoonsiga qabiilka

Biilasha (elektroonig ahaan lagu helay ama boostada)

Biilasha biyaha, korontada, gaasta muddo ah 30-maalmood ee maalinta doorashada

- Taleefonka (guri, gacan, VOIP, iwm.)
- TV (kaybal, satalayt, iwm.)
- Adeega internetka
- Koronto, gaas, biyo, qashin, bulaacad, ama qashinka adag

Bayaanka iijaarka 30 maalmood gudahood maalinta doorashada oo ay ku taxan yihiin adeegyadu

Bayaanka ujrada ardayga

Wax walba sharciga ayaa leh awoodda u dambeysa.